

Maclumaadka Gaadiidka

Haday ilmahaaga uu u baahnayn gaadiidka baska ee sanad dugsiyeedka 2022-23, fadlan DOORO INAAD UGA BAXDID halkan.

Licking Heights ayaa ku faraxsan inay ku dhawaaqdo inaad hadda qadka ka heli kartid maclumaadka baska cunugaaga adigoo adeegsanaayo Ride 360. Raac talaabooyinka xigo sifo aad u eegtid maclumaadka cunugaaga:

1. Adigoo isticmaalayo Chrome mise Firefox, aad <https://ohlickingheightslsd.traversaride360.com/>
2. Hadaad weli lahayn iimayl diiwan geshan, riix "Diiwan Geli."
3. Sifo aad isu diiwan gelisid, qor cinwaanka iimaylka, furaha sirta, iyo magacaaga.
4. Ka dib markaad diiwan gelinta samaysid, waxaad heli doontaa iimayl xaqiijinaayo. Riix link-iga ku jiro iimaylkaaga sifo aad u xaqiijisid diiwan gelintaada bogga internet=ka Ride 360.
5. Gal nidaamka, ka dib na ku raadi ardayga adigoo tagayo qaybta Ardaydayda ka dib na riixaayo qaybta "Raadi Ardayga".
6. Gali maclumaadka gaarka ay uga baahan yihiin degmada sifo loo helo ardayga. Ku celi talaabadan sifo aad ugu kordhisid ardayda dheeraadka. Hadii aad caawinaad u baahatid, fadlan la xiriir degmadaada dugsiga.
7. Markaad heshid maclumaadka ardayga, riix diiwaanka ardayga sifo aad u heshid dhammaan maclumaadka gaadiidka muhiimka ah.
8. Sifo aad ula qaybsatid link-iga ardayga qof kale, dooro arday ka dib na riix qaybta dooqyada ardayga ee ku taalo geeska hoose ee midigta.
9. Dooro ardayda aad maclumaadkooda qaybin rabtid, ka dib na geli iimaylka qofka aad la qaybsan rabtid. Qofkaas ayaa heli doonaa iimayl xaqiijin ah oo si otomaatig ah ugu hagi doonto ardayda lala qaybsaday. Dadka loo diraaqo waa inay isu diiwan geliyaan Ride 360, hadii ay wali hore isu diiwan gelini, sifo loo helo maclumaadka ardayga.

Hadii aad wax su'aalo leedahay mise aad u baahan tahay inaad isbedelaad ka samaysid gaadiidka cunugaaga, fadlan kala xiriir xafiiska gaadiidka (740) 927-3340. XUSUUSO: Hadii aad leedahay arday xanaanada dhigto, waalid mise qof wayn oo loo wakiishay (qof wayn oo lagu buuxiyay foomkaada EMA) waa inuu mar walbo ku sugaayo bostaajada inta lagasoo fasaxin baska.